

# TILMAAMAHA LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA NUKLEARKA KLIINIKADA MANKATO

## Sawirka Shaqada Murqaha Wadnaha (Myocardial Perfusion Imaging) iyo Baarista Shiddada Bukaanka aan Isticmaalin Karin Mashiinka Lagu Socdo (Lexiscan Stress Test)

Myocardial Perfusion Imaging with Lexiscan Stress Test - Somali

**Bukaanka:** \_\_\_\_\_

**Taariikhda Ballanka:** \_\_\_\_\_ **Waqtiga:** \_\_\_\_\_ am / pm

**Goobta: Nuclear Medicine Department, Mankato Clinic, 1230 East Main Street, Mankato, MN 56001**

### Baarista Ka Hor:

- Ha cabbin sigaar muddo 24 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah sharootada nikotiinka.
- **Ha cunin ama ha cabbin waxyaabaha laga helo kaffeine, muddo 12 saac ka hor inta aadan gelin baarista. Waxaa ka mid ah qaxwada laga saaray kaffeyiinka iyo dhamaan noocyada shaaha, cabbitaanka, waxyaabaha ka samaysan shukulaatada, Anacin® iyo Excedrin®.**
- **Ha cunin ama ha cabbin waxba muddo 6 saac ka hor inta aadan gelin baarista.**
- **Ha marsan saliid korka** (maxaa yeelay sharootada ECG si wanaagsan uguma dhagi doonto).
- Raac tilmaamaha ku saabsan isticmaalka daawada aad ka soo qaadatid bixiyehaada.
- Waxaad keentaa liis qoran oo ku saabsan dhamaan dawooyinka aad qaadatid. Hubso in aad ku dartid dawooyinka la qoro, dawooyinka laga iibsado miiska, maadooyinka dabiiciga iyo cagaarka.
- Waxaad keentaa qalabka lagu neefsado ee aad sida joogtada ah u adeegsatid.
- Ha soo qaadanin shay laga helo macdanta birta inta ka koreyso dhexda.
- Waxaad qaadataa labbis holof ah, u roon korka iyo kabaha socodka.
- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad iska dhigtid dharka laga bilaabo dhexdaa ilaa inta ka koreyso. Dumarka waxaa la weydiin doonaa in ay qaataan naas celinta, waxaana la siin doonaa gorgoro ay qaataan inta ay socoto baarista.
- Haddii aad la kulantid qufac waqtiga baarista, fadlan soo qaado dawooyinka joojiya qufaca/shorobada.
- U sheeg bixiyehaada haddii aad naas nuujisid, haddii aad uur leedahay ama haddii aad u maysid in aad uur leedahay.
- **Xasuusinta la siiyo Bixiyeaasha:**
  - Bukaanka isticmaala dawooyinka dipyridamole ama dipyridamole (aggrenox, persantine) waxay u baahan yahiin in ay kala tashtaan bixiyehooda. Lama qaadan karo dawooyinka muddo 48 saac gudahooda kaddib marka la galo baarista.
  - Bukaanka la siiyay dawooyinka aminophylline muddo 24 saac ka hor inta aan la gelin baarista waxay u baahan yahiin in ay dib u ballansadaan baarista shiddada (stress).
  - Waxaa dhici karto in Methylxanthines iyo Theophylline soo farageliyaan hawsha Lexiscan.

### Inta ay Socoto Baarista:

- Farsame yaqaanka wuxuu bilaabi doonaa in uu cirbad ku muddo garabkaada ama gacantaada, xididka dhiigga ku celiya wadnaha (intravenous) (IV)
- Waxaa laguugu durri doonaa maadada shucaaca aad ka qaadatid cirbidda IV.
- Waxaad u seexan doontaa dhabarka adiga oo seexda miiska sawirka.
- Sawiro ayaa laga qaadi doonaa wadnahaada, waxaana lagu qaadi doonaa kaamera khaas ah. Qiyaas ahaan, tan waxay qaadan doontaa 25 daqiiqo. **WAA** in aad seexatid aadna dhaqaaqain inta sawirada la qaadaayo.
- Waxaad tagi doontaa shaybaarka qeybta shiddada baarista. Kalkaaliye ama farsame yaqaanka shiddada ayaa sharootada ECG ku dhajin doono xabadkaada iyo wuxuu suunka cadaadiska dhiigga ku xeri doonaa gacantaada. Waxaa loo isticmaali doonaa in laguugu kormeero inta baarista socoto.
- Waxaa laguugu durri doonaa cirbadda Lexiscan iyo waxaad maadada shucaaca ka qaadan doontaa IV.
- Baarista shiddada kaddib, waxaa wadnahaada laga qaadi doono sawiro. Sawiradaan waxay qaadan doonaan 15 ilaa 20 daqiiqo. **WAA** in aad seexatid aadna dhaqaaqain inta sawirada la qaadaayo.
- Qiyaas ahaan, baarista waxay qaadataa 3 ilaa 4 saac.

### Baarista Kaddib:

- Waa lagaa saari doonaa sharootada IV iyo ECG.
- Heerka dhaqaaqa: U dhaqaaq sida uu ku talliyo bixiyehaada ilaa aad ka heshid natiijada. Haddii bixiyehaada uusan ku siinin tilmaamo ku saabsan dhaqaaqa, fadlan yaree dhaqaaqa ilaa bixiyehaada kaala soo xariiro natiijada baarista.
- Kooxda daryeelka caafimaadka ee fullisa baarista awood uma yeelan doonaan in ay ku siiyaan natiijada baaristaan kaddib marka la dhamaystiro.
- Xafiiska bixiyehaada ayaa kaala soo xariiri doono natiijada baarista.

**Haddii aad u baahan tahay in aad dib u dhigatid ama joojisid ballanka, ama haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan baarista, wac 507-385-3955.**

**Nuclear Medicine waxay ku taal Main Street, dabaqa kowaad.  
Fadlan iska xaadiri waaxda Wadnaha (Cardiology).**